**XAASHIDA MACLUUMAADKA EE LOOGU TALAGALAY WAALIDKA/MASUULKA**
**AQOONSIGA IRAS: 339327**

# Go'aaminta suurtagalnimada ah in carruurta iyo dhallinyarada si aan kala sooc lahayn loogu dooro Farsamooyinka muunad qaadista kaadida ee jirka wax lagu duro iyo kuwa aan u baahnayn in jirka wax lagu duro

## Daraasadda **FROG**

**Waxaan jeclaan lahayn inaan ku martiqaadno ilmahaaga inuu ka qaybqaato daraasadda cilmi-baarista.**

- Kahor intaadan go'aansan waxaan jeclaan lahayn inaad fahanto sababta cilmi-baarista loo sameynayo iyo waxa aad ugu lug yeelanaysaan daraasadda adiga iyo ilmahaaga.
- Xubin ka tirsan kooxda daraasadda ayaa kula mari doona xaashi xogeedkan.
- Fadlan weydii su'aalo ku saabsan wax kasta oo aan kuu caddayn.
- Fadlan wakhti ku qaado in aad si taxadar leh u akhrido macluumaadka oo kala hadal qoyskaaga iyo asxaabtaada haddii aad rabto.

## Waad ku mahadsan tahay waqtiga aad ku bixisay ka fikirka ka qaybqaadashada daraasadda FROG

### Waa maxay sababta daraasaddan loo sameeynayo?

Daraasadani waxay ku saabsan tahay uruurinta muunada kaadida carruurta iyo dhalinyarada (CYP) ee looga shakisan yahay caabuqa kaadida. Ujeedada daraasadda ayaa ah in la ogaado haddii ay tahay mid la aqbali karo oo suurtagal ah in carruurta iyo dhalinyarada laga diiwaangeliyo tijaabo caafimaad oo mustaqbalka ah taas oo tijaabin doonta habka ugu wanaagsan ee qaadista muunada kaadida CYP.

Caabuqyada kaadi-mareenka (UTI-yada), oo sidoo kale loo yaqaano infekshinada kaadida, ayaa aad ugu badan CYP. Qiyaastii 1 ka mid ah 10kii gabdhood iyo 1 ka mid ah 30kii wiilba waxay la kulmi doonaan UTI marka ay da'doodu tahay 16 jir. Caabuqyadani waxay sababi

karaan astaamo ay ka mid yihiin qandho sareysa, calool xanuun, iyo matag, kuwaas oo dhib ku noqon kara CYP iyo waalidiinta labadaba.

In UTI-yada la ogaado goor hore waa muhiim si looga hortago dhibaatooyinka sida dhaawaca kelyaha. In UTI-yada la ogaado waxay ku lug leedahay in kaadida laga baaro astaamaha caabuqa. Baaritaanada waxaa saameyn ku yeelan kara nadiifnimada muunada kaadida. Mararka qaarkood, wasakhowga ama wasakhda maqaarka ama aagga hoose (birida) ayaa si lama filaan ah loola uruurin karaa kaadida. Tani waxay muujin kartaa inuu jiro caabuq xitaa marka aanu caabuq jirin waxayna taasi sababi kartaa in la sameeyo baaritaano dheeraad ah oo aan loo baahnayn, ballamo daba-gal ah iyo antibiyootigyo la siiyo ilmaha/qofka dhalinyerada ah.
Sida kaadida loo qaado waxay door muhiim ah ka ciyaartaa ka hortagga wasakhowga. Sida habboon muunadaha kaadida waxaa la qaadaa iyadoo la adeegsanayo farsamada 'dhexda qulqulka' taas oo ah in muunada la qaado inta lagu jiro musqusha ama la saaran yahay tuunjiga inta lagu jiro kaadinta iyadoo kaadida laga soo uruurinayo qulqulka. Haddii ilmuhu aanu ku tababarnayn isticmaalka tuunjiga kaadida laguma uruurin karo 'farsamada dhexda qulqulka'.

Marka farsamada 'dhexe qulqulka' aan la isticmaali karin, kaadida ayaa la qaadi karaaa iyadoo
(1) la isticmaalayo habka 'qabsashada nadiifka ah', tani waxay ku lug leedahay in kaadida lagu shubo weel marka ilmaha uu kaadinayo,
(2) tuubo caag ah (katheetar) la gelinayo kaadiheysta iyada oo la marinayo kaadi-mareenka, ama
(3) si toos ah irbad loo gelinayo kaadiheysta iyadoo loo marayo maqaarka caloosha.

Habka 'qabsashada nadiifka ah' waa mid aan xanuun lahayn laakiin sidoo kale waa mid gaabis ah oo u nugul wasakhow; ilaa 1 ka mid ah 2dii muunadood ee kaadi ah ee lagu aruuriyo habkan waxaa soo gaara wasakhow. Hababka kaadi uruurinta ee kateetarka iyo irbada waa degdeg waxayna leeyihiin heerar wasakhow ah oo hooseeya oo ah ilaa 1 ka mid ah 100kii muunadood oo kaadi ah oo la qaado, laakiin hababkani waxay noqon karaan kuwo aan raaxo lahayn.

Boqortooyada Midowday (UK), tilmaamaha caafimaadka waxay ku talinayaan habka 'qabsashada nadiifka ah'. Xeerarka Yurub iyo Mareykanka waxay ku talinayaan in la isticmaalo habka kateetarka ama habka irbadda. Cilmi-baaris ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo habka ugu fiican ee muunad qaadista kaadida. Kahor intaanan samaynin tijaabo caafimaad oo aad u weyn waxaan u baahanahay inaan ogaano haddii tijaabo baaxad weyn ay suurtagal tahay iyo haddii waalidiinta, dhalinyarada iyo caruurtu ay oggolaan doonaan inay ka qaybqaataan. Kooxda cilmi-baarista ayaa ku siin kara koodka QR si aad u aragto muuqaal/fiidiyow gaaban oo ku saabsan daraasadda FROG.

## Waa maxay sababta aniga iyo ilmahayga naloogu martiqaaday inaan ka qaybqaadano daraasadda?

Adiga iyo ilmahaaga ayaa la idin martiqaaday sababtoo ah dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka daryeela ilmahaaga waxay u baahan yihiin muunada kaadida ee ilmahaaga, ilmahaaguna ma bixin karo 'muunada kaadida ee laga qaado qulqulka kaadida'. Dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka waxay jeclaan lahaayeen inay ogaadaan habka ugu wanaagsan ee ilmahaaga looga qaadi karo muunada kaadida.

## Ma khasab baa inaan ka qaybqaadano?

Maya, adiga ayay kugu xiran tahay inaad go'aansato in adiga iyo ilmahaaga aad rabtaan inaad ka qaybqaadataan iyo in kale.  Haddii aad ogolaato inaad ka qaybqaadato, waxaa lagu siin doonaa xaashidan xogeed si laguu siiyo wixii warbixin ah waxaana lagaa codsan doonaa inaad saxiixdo foomka ogolaansho bixinta. Waxaad weli go'aansan kartaa inaad ka noqoto oggolaanshahaaga ku aadan inuu ilmahaaga ka qaybqaato daraasadda wakhti kasta adigoo bixin wax sabab ah.  Haddii aad go'aansato in ilmahaagu aanu ka qaybqaadan daraasadda, tani wax saamayn ah kuma yeelanayso xuquuqaahaga sharciyeed ama daryeelka caafimaadka ilmahaaga wakhti kasta, hadda iyo mustaqbalkaba.

## Waa maxay daryeelka caadiga ah?

Daryeelka caadiga ah ee uruurinta muunada kaadida waa ay ku kala duwan yihiin isbitaallada iyo dhakhaatiirta, waxayna ku xirnaan kartaa sababta loogu baahan yahay muunadda kaadida iyo baaritaannada la xiriira. Dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadka ayaa kugu wargelin karaan waxa uu yahay daryeelka caadiga ah ee uruurinta muunada kaadida kaas oo ka jira isbitaalkaaga. Dhammaan hababka qaadista muunada kaadida ee ku jira daraasaddan waa habab la aqoonsan yahay oo la oggolyahay oo lagu qaado muunadaha kaadida.

## Maxaa dhacaya haddii aan ogolaado in ilmahayga uu ka qaybqaato daraasadda FROG?

Daraasadda FROG waa daraasad yar oo lagu wargelinayo naqshadaynta tijaabada caafimaad ee mustaqbalka.


Kahor intaanan naqshadaynin tijaabadaas waxaan u baahanahay caawimadaada. Haddii aad ogolaato in ilmahaaga uu ka qaybqaato daraasadda FROG, kalkaalisada cilmi-baarista ayaa ku siin doonta foomka ogolaansho bixinta si aad u buuxiso, waxaanan uruurin doonaa xogta caafimaadka ilmahaaga iyo muunada kaadida.  Xogtan iyo muunadda kaadida si joogto ah ayaa loo uruuriyaa oo loo tijaabiyaa iyada oo qayb ka ah daryeelka caafimaad ee caadiga ah ee la xiriira caabuqyada ku dhaca kaadi-mareenka ee looga shakisan yahay ilmaha.  Waxaan idin ka codsan doonaa adiga ama ilmahaaga inaad buuxisaan laba su'aalood ka dib marka ilmaha laga qaado muunada kaadida. Waxaan sidoo kale kaa codsan doonaa inaad buuxiso Foomka Su'aalaha Isticmaalka Kheyraadka Caafimaadka qiyaastii 3-6 bilood laga bilaabo maanta.

Intaa waxaa dheer, waxaan kaa codsan doonaa inaad tixgeliso inaad nagu caawiso:

- Buuxinta Foomka Su'aalaha Loogu Talagalay Waalidka/Masuulka
- Oggolaanshaha in ilmahaaga si aan kala sooc lahayn loogu meeleeyo mid ka mid ah hababka qaadista muunada kaadida ee maanta
- Oggolaanshaha in lagula soo xiriiro oo haddii la idin doortana in adiga iyo/ama ilmahaaga la idin ka qaadi doono waraysi mustaqbalka
- Oggolaanshaha in lagula soo xiriiro oo haddii la idin doortana in adiga iyo ilmahaaga ka xaadirtaan kulan looga hadlayo natiijooyinka daraasadda

## Shaxda Hawlaha Daraasadda

Qaab kale oo lagu ogaan karo waxa dhici doona inta ay daraasaddu socoto waa in la akhriyo shaxda hawlaha daraasadda ee hoose.




## Waxaad dooran kartaa qaybta daraasadda FROG ee aad qaybqaadanayso.

## Waa maxay waxyaabaha ku lug leh foomka Su'aalaha Waalidka/Masuulka iyo qaybta waraysiga ee Daraasadda FROG?

Tijaabooyinka caafimaadku waxay noqon karaan kuwo adag oo kharash badan in la sameeyo oo inta badan waa lagu dhibtoodaa in la diiwaangeliyo bukaanno ku filan oo ka jawaaba su'aasha cilmi-baarista. Marka waalidiinta, carruurta iyo shaqaalaha isbitaalka laga qaybgeliyo

qaabaynta tijaabada bukaan-socodka waxay taasi naga caawin kartaa xaqiijinta in tijaabada noqoto mid la aqbali karo oo qoysaska udub dhexaad u noqdaan. Waxaan jeclaan lahayn inaan kugu casuunno inaad buuxiso xogwaraysi kooban oo waraaq ah oo ku dhawaad 5 daqiiqo qaadanaysa (fadlan weydii kalkaalisada ama dhakhtarka). Xog-ururinta ayaa ku weydiin doonta ra'yigaaga ku saabsan tijaabada la soo jeediyay iyo sababahaaga ka dambeeya inaad oggolaato ama diido in ilmahaaga si aan kala sooc lahayn loogu meeleeyo hababka qaadista muunada kaadida ee kor lagu sharaxay. Foomka su'aalaha ayaa sidoo kale ku weydiin doona su'aalo ku saabsan waxa asal u ahaa go'aamadan iyo wax kasta oo aan samayn karno si aan u wanaajino la xiriiritaanka waalidiinta ee daraasadda FROG mustaqbalka.

Cilmi-baare ka socda Jaamacadda Liverpool ayaa sidoo kale jeclaan lahaa inuu kala hadlo waalidiinta iyo carruurta (haddii ay ku faraxsan yihiin inay ka qaybqaataan) daraasadda FROG. Haddii la doorto, waraysiyadan waxay socon doonaan in u dhaxaysa 40 - 60 daqiiqo waxayna ku jiri doonaa su'aalo la mid ah su'aalaha xogwaraysiga laakiin si ka sii faahfaahsan. Ujeedada waraysiyadani waa in la ogaado aragtiyo kala duwan oo ku saabsan hababka qaadista muunada kaadida iyo qaabaynta daraasadda mustaqbalka. Waxaan rabnaa in aan maqalno aragtiyo iyo fikrado kala duwan, oo ay ku jiraan **aragtida waalidiinta doorta in aysan ogolaan in ilmahahooda si aan kala sooc lahayn loogu meeleeyo mid ka mid ah hababka qaadista muunada kaadida. Aragtidaada aad bay muhiim noogu tahay.**

Fadlan sheeg haddii aad rabto inaad ka qaybgasho xogwaraysiga iyo/ama waraysiyada adigoo magacaaga ku saxiixaya sanduuqyada khuseeya ee foomka oggolaanshaha. Haddii adiga/ilmahaga aad oggolaataan in idin kala soo xiriiro wareysiga, waxaa la idin ka codsan doonaa inaad bixisaan tafaasiisha la idin kala soo xiriiri karo. Fadlan kuwan u celi qofka kaala hadlay cilmi-baarista.

Haddii adiga/ilmahaaga aad doorataan waraysiga, cilmi-baare ka socda Jaamacadda Liverpool ayaa idin kula soo xiriiri doona taleefan iyo/ama iimayl si uu waraysiga u diyaariyo wakhti ku habboon inta lagu jiro bisha soo socota. Wareysiyada waxaa lagu qaban doonaa khadka, taleefan (midkasta oo aad doorato) ama fool ka fool haddi aad ku nooshahay Waqooyi-galbeed ee England.

Wareysiga ka hor, waxaan soo diri doonaa xaashi xogeed oo kooban (midaan oo kale) taas oo loo isticmaali doono in lagu casuumo waalidiinta/masuuliyiinta ama carruurta si ay uga qaybqaataan tijaabada caafimaadka FROG.

Wareysiyada waxaa si xirfadeysan qoraal ugu bedeli doona shirkad la yiraahdo UK Transcription. Wareysiga ka dib, waxaan ka qaybgale kasta u soo diri doonaa 30 doolar oo foojarka Amazon ah si aan uguga mahadcelino wakhtigooda.

## Waa maxay waxyaabaha ku lug leh qaybta si aan kala sooc lahayn ugu meelaynta Daraasadda FROG?

Haddii aad sidoo kale ogolaato in ilmahaaga si aan kala sooc lahayn loogu meeleeyo mid ka mid ah hababka qaadista muunada kaadida markaas kombuyuutar ayaa wuxuu si aan kala sooc lahayn u dooran doona habka qaadista muunada ee ilmahaaga, waxaana laguu soo sheegi doonaa natiijada.  Adiga iyo dhakhtarka ilmahaaga labadiinaba midna ma dooran doono kooxda uu ilmahaagu ka mid noqon doono.  Ilmahaaga waxaa si aan kala sooc lahayn loogu meeleyn doonaa:

**Habka qaadista muunada kaadida ee aan durniinka lahayn:**

(a) Qaadista muunada kaadida ee nadiifka ah (muunad kaadi oo lagu qaado baaquli yar) (wakhtiga ay qaadanayso in la uruuriyo kaadida waa ku dhawaad 30 daqiiqo)

**AMA**

**Habka qaadista muunada kaadida ee duritaanka leh:**

(b) Tuubo caag ah (kateetar) in la geliyo kaadiheysta iyada oo la sii marinayo kaadi-mareenka (wakhtiga ay qaadanayso in la uruuriyo kaadida waa ku dhawaad 5 daqiiqo)

**AMA**

**Habka qaadista muunada kaadida ee duritaanka leh:**

(c) In irbad si toos ah loo geliyo kaadiheysta iyadoo la sii marinayo maqaarka caloosha (wakhtiga ay qaadanayso in la uruuriyo kaadida waa ku dhawaad 5 daqiiqo)

Waxa laga yaabaa inaanay suurtogal ahayn in dhammaan hababka qaadista muunada kaadida ee duritaanka leh loo soo bandhigo dhammaan ka qaybgalayaasha oo haddii aan midna la heli karin (ama aan ku habboonayn) waa lagugu soo wargelin doonaa, ilmahaagana laguma meelayn doono inuu helo habkaas. Koox kasta oo ilmahaaga galo, waxa wali daryeeli doona isla kooxda dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ee daawaynaya hadda.

## Waa maxay waxyaabaha ku lug leh qaybta kulanka ee Daraasadda FROG?

Wejiga ugu dambeeya ee daraasaddu waxay ku lug yeelan doontaa kulan is-afgarad oo fool-ka-fool ah oo la isugu keenayo Dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, iyo waalidiinta si ay dib ugu eegaan dhammaan macluumaadka la uruuriyay inta lagu jirey daraasadda iyo si ay u raadiyaan fikrado ku saabsan in daraasad ballaaran oo la isugu barbardhigayo hababka qaadista muunada kaadida ee duritaanka leh iyo kuwa aan duritaanka lahayn ay tahay mid macquul ah oo la aqbali karo in la sameeyo.

Fadlan nala soo socodsii haddii aad rabto inaad ka qaybqaadato kulanka isku raacitaanka go'aanka adigoo magacaaga ku saxiixaya sanduuqyada khuseeya ee foomka oggolaanshaha.

Haddii adiga/ilmahaaga aad doortaan inaad ka qaybgashaan kulanka isku raacitaanka go'aanka, warqad casuumaad ah ayaa laguugu soo diri doonaa iimayl, warqadaas oo ku qoran

faahfaahinta goobta, taariikhda iyo wakhtiga kulanka. Kharashaad safarka ee kulanka waa laguu soo celin doonaa.

## Maxaa dhacaya marka ka-qaybqaadashada ilmahayga ee daraasaddan cilmi-baarista ay joogsato?

Ilmahaaga waxaa uu weli daryeel ka heli doonaa dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka caadiga ah ee hadda daryeelaya ilmaha.

## Waa maxay faa'iidooyinka suurtagalka ah ee laga helayo ka qaybqaadashada daraasadda?

Inkastoo aysan jirin faa'iidooyin degdeg ah oo uu ilmaahaga ka helayo ka qaybqaadashada daraasaddan, waxaa la rajeynayaa in ka qaybqaadashadaada iyo/ama ka qaybqaadashada ilmahaaga inay gacan ka gaysan doonto inaan go'aan ka gaarno haddii aan samayn karno daraasad ballaaran mustaqbalka si loo qiimeeyo hababka ugu fiican ee qaadista muunada kaadida.

## Waa maxay faa'iido dorrooyinka iyo khataraha suurtagalka ah ee lagala kulmi karo ka qaybqaadashada daraasadda?

Dhammaan hababka qaadista muunada kaadida waa kuwo si ballaaran loo heli karo oo si caadi ah loo isticmaalo. Habka qaadista muunada kaadida ee nadiifka ah waa mid xanuun la'aan ah laakiin waxay qaadan kartaa waqti dheer in la uruuriyo waxayna noqon kartaa mid aan sax ahayn taasoo sababi karta in daawayn khaldan la bixiyo. Habka qaadista muunada kaadida ee la isticmaalo kateetarka iyo cirbadda ayaa aad u saxsan una dhaqso badan in la qaado laakiin waxay keeni karaan raaxo darro. Waxa jirta khatar yar oo ah in la qaado infekshan marka la isticmaalayo kateetarka, iyo waxaa jira khatar yar oo ah wasakhowga dhiigga marka la isticmaalayo habka irbida (suprapubic aspiration).

## Jadwalka Daraasadda

| Wakhtiga | Maxaa dhici doona marka xigta |
|---|---|
| Isbitaalka dhexdiisa | La kulan dhakhtarka iyo kooxda daraasadda. Hel Xaashida Macluumaadka.<br>Haddii aad oggolaato, bixi ogolaansho aad xog ogaal ah u tahay:<br>• Xog uruurinta<br>• Si ilmahaaga si aan kala sooc lahayn loogu meeleeyo mid ka mid ah hababka qaadista muunada kaadida<br>• Buuxinta Foomka Su'aalaha Waalidka/Masuulka<br>• In laguula soo xiriiro ka qaybqaadashada waraysiga |

| | |
|---|---|
| | • In laguula soo xiriiro ka xaadiritaanka kulan loogaga hadlayo natiijada daraasadda |
| Isbitaalka | Adiga/ilmahaaga waxaad buuxinaysaan xog-ururinta gaaban ee ku saabsan habka qaadista muunada.<br>Haddii aad ogolaato, buuxi Foomka Su'aalaha Waalidka/Masuulka. |
| 1 bil gudaheed | Hadii adiga/ilmahaga aad ogolaataan in la idin kala soo xiriiro waraysiga oo la idin doorto:<br>Waxaa lagugu martiqaadayaa in aad aragtidaada la wadaagto cilmi-baarayaasha iyada oo loo marayo khadka ama kulan fool ka fool ah si loo fahmo sida ugu wanaagsan ee mustaqbalka loo qaabeeyo daraasad. |
| 3-6 bilood gudahood | Buuxi oo soo celi Foomka Su'aalaha Isticmaalka Kheyraadka Caafimaadka. |
| 1 sano gudahood | Hadii adiga/ilmahaga aad ogolaataan in la idin kala soo xiriiro ka xaadiritaanka kulanka oo la idin doorto:<br>Waxaa lagugu martiqaadayaa inaad ka soo qaybgasho kulan fool ka fool ah oo lagaga hadlayo natiijada daraasadda |

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in ilmahayga uu sii wado ka qaybqaashada daraasadda?

Waxaad ilmahaaga ka saari kartaa daraasadda wakhti kasta adigoon bixin sabab, daryeelka ilmahaagana wax saamayn ah ma soo gaari doonto. Ilmahaaga waxaa uu weli daryeel ka heli doonaa kooxda caadiga ah ee dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha isbitaalka waxana ay siin doonaan daawaynta ay u arkaan in ay u fiican tahay ilmahaaga. Haddii aad go'aansato inaad ilmahaaga ka saarto daraasadda FROG, waa inaad la xiriirtaa kooxda daraasadda ee isbitaalkaaga. Fadlan si toos ah ula hadal kalkaalisada cilmi-baarista ama la xiriir cilmi-baaraha/PI ee goobtaada deegaanka haddii adiga ama ilmahaaga aad jeclaan lahaydeen inaad ka baxdaan daraasadda wakhti kasta. Faahfaahinta lagala xiriiro cilmi-baaraha/PI ee goobtaada waxaa laga heli karaa dhamaadka xaashidan macluumaadka. Haddii aad ilmahaaga kala baxdo daraasadda, waxaanu isticmaali doonaa xogta la uruuriyey ilaa wakhtiga ka saaritaanka ilmahaaga ee daraasadda.

## Maxaa dhacaya haddii ay wax qaldamaan?

Isbitaalka NHS ayaa weli masuul ka ah daryeelka ilmahaaga inta ay daraasaddu socoto. Haddii aad ka welwelsan tahay dhinac kasta oo ku saabsan sida laguula soo xiriiray ama ilmahaaga loola dhaqmay intii lagu jiray daraasadda FROG, fadlan la xiriir Maamulaha Cilmi-baarista ee degaanka (faahfaahinta laga xiriiro waxay ku yaalaan halkan hoose), kaasoo ku dadaali doona inuu ka jawaabo su'aalahaaga. Haddii aadan ku qanacsanayn oo aad rabto inaad si rasmi ah u gudbiso cabasho, waxaad sidaas ku samayn kartaa adeegga cabashooyinka ee NHS ee isbitaalkaaga (faahfaahinta laga xiriiro waxay ku yaalaan halkan hoose). Haddii ay dhacdo in ilmahaagu dhibaato ka soo gaarto ka qaybqaadashada daraasaddan, sababtuna tahay

dayacaad uu sameeyay qof, markaas waxa laga yaabaa inaad haysato sabab aad dacwo rasmi ah kaga gudbiso Queen's University Belfast laakiin waxaa laga yaabaa inaad adiga bixiso kharashaadka sharciyeed.

## Ma ilaalin doonaa qorsoodinimada macluumadka daraasadda?

Xog kasta oo laga soo uruuriyo ilmahaaga ama adiga inta lagu jiro daraasadda waxa loo hayn doonaa si qarsoodi ah oo keliya waxaa arki doonaan shaqaalaha ku lug leh daraasadda ee ka socda NHS Trust, Trial Co-ordinating Centre (Northern Ireland Clinical Trials Unit, Belfast Health and Social Care Trust), Queen's University Belfast, University of Liverpool iyo dadka ka socda hay'adaha maamulka ee hubinaya in si sax ah loo fuliyay daraasadaha midan oo kale ah. Dhammaantood waxaa saaran waajibaad ah inay ilaaliyaan qarsoodinimada ah xogtaada iyo xogta ilmahaaga ka qaybqaatayaasha cilmi-baarista ahaan.

Dhammaan macluumaadkaaga la xiriira daraasadda waxaa lagu hayn doonaa qarsoodi, marka laga reebo haddii, xaalado naadir ah oo loo maleeyo in adiga, ilmahaaga, ama qof kale aad khatar degdeg ah ku jirtaan, ama haddii faahfaahinta dembi ama dhaqan-xumo hore u dhacday oo aan laga warbixin ay shaaca ka qaadmaan. Xaaladahan oo kale, cilmi-baarayaashu waxaa saaran waajibaad sharci ah oo ah inay macluumaadkan la wadaagaan masuuliyiinta ay khusayso.

Maadaama NHS Trust ay u baahan doonto inay kula soo xiriirto ka dib marka ilmahaagu ka baxo isbitaalka, NHS Trust waxay u baahan doontaa inay diiwaan ku hayso magacaaga, cinwaankaaga, iyo faahfaahinta kale ee xiriirka sida lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka.

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto macluumaadka caafimaadka shakhsi ahaaneed ee ilmahaaga ee la xiriira daraasadda cilmi-baarista, laakiin ma awoodi doontid inaad dib u eegto qaybo ka mid ah macluumaadka ilaa daraasaddu ka dhammaato. Marka la daabaco wax macluumaad ah oo ka soo baxa daraasadda, kuma jiri doonaan macluumaadka shakhsi ahaaneed oo suurtagal ma noqon doonto in shakhsi ahaan loo aqoonsado ka qaybgalayaasha daraasadda.

Xogta laga soo uruuriyay daraasaddan ayaa la hayn doonaa ugu yaraan toban sano ka dib marka la soo gabagabeeyo daraasadda. Xogta caafimaadka gaarka ah ee ilmahaaga waxa hayn doonaan Trial Co-ordinating Centre, Belfast Health and Social Care Trust. Haddii aad ogolaato inaad buuxiso Foomka Su'aalaha Waalidka/Masuulka, xogtan waxa lagu hayn doonaa Jaamacadda Liverpool.

Haddii adiga/ilmahaga aad ogolaataan in idin la soo xiriiro si aad waraysiga uga qaybqaadataan, faahfaahinta la idin kala soo xiriiro waxa lala wadaagi doonaa kooxda cilmi-baarista ee Jaamacadda Liverpool, kuwaas oo qaban doona waraysiyadan. Haddii

adiga/ilmahaga aad ogolaataan in la idin la soo xiriiro si aad uga qaybgashaan kulan mustaqbalka ah, faahfaahinta la idin kala soo xiriiro waxa lala wadaagi doonaa University of Liverpool iyo Trial Co-ordinating Centre. Faahfaahinta xiriirka ee la bixiyay waxaa la hayn doonaa kaliya ilaa daraasadda ay ka dhammaato.
Xogta la uruuriyey ee qayb ka ah daraasadda FROG waxaa lala wadaagi karaa oo lagu isticmaali karaa daraasado kale oo cilmi-baaris ah laakiin haddii qaabkaas loo isticmaalo dhammaan waxyaabaha qofka lagu aqoonsan karo ayaa laga saarayaa suurtagalna ma noqon doonto in qofka la aqoonsado.

## Maxaa ku dhici doona natiijada daraasadda cilmi-baarista?

Diiwaangelinta waxay bilaaban doontaa 2025 waxaana daraasadda la filayaa inay qaadato 1-2 sano in la dhamaystiro. Waxaa la rajeynayaa in daabacaadda natiijooyinka ay wakhti yar uun ka dambayn doonto dhammaadka daraasadda, iyada oo lagu soo daabici doono joornaalada caafimaadka, websaydyada, war-saxaafadeedyada, iyo iyada oo loo marayo kooxaha taageerada ee ku habboon. Natiijooyinka waxaa sidoo kale loo soo bandhigi doonaa dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha kale xilliyada kulmada iyo shirarka. Magacyada ka qaybgalayaasha kama soo muuqan doonaan warbixinada ama daabacaadaha ka soo baxa daraasadda. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho natiijada daraasadda, fadlan u sheeg kooxda daraasadda ee isbitaalkaaga oo bixi faahfaahinta lagaala soo xiriiri karo. Faahfaahinta lagaala soo xiriiri karo waxaa lala wadaagi doonaa xarunta Trial Co-ordinating, kuwaas oo ku siin doona koobiga natiijada marka la gaaro dhamaadka daraasadda.

## Yaa agaasimaya oo maalgelinaya daraasadda?

Daraasada FROG waxaa soo qabanqaabiyay koox dhakhaatiir ah oo ay hogaaminayaan Dr Tom Waterfield iyo Professor Kerry Woolfall. Dr Tom Waterfield waa Mutacalim Sare oo ka tirsan Queen's University Belfast wuxuuna La-taliye ku Takhasusay Daawaynta Degdega ah ee Carruurta ee Isbitaalada Royal, Belfast, Northern Ireland. Professor Kerry Woolfall waa cilmi-baare ka tirsan the University of Liverpool. Daraasadda FROG waxaa maalgeliya Machadka Qaranka ee Cilmi-baarista Caafimaadka iyo Daryeelka (National Institute for Health and Care Research), Barnaamijka Qiimaynta Tignoolajiyada Caafimaadka (Health Technology Assessment Programme). Kafaala-qaadaha daraasadda waa Queen's University Belfast. Kafaala-qaadaha daraasada wuxuu xaqiijiyaa in cilmi-baarista loo sameeyo si heer sare ah si loo ilaaliyo badbaadada iyo xogta bukaanka. Ma jiraan wax lacag-bixin ama magdhow ah oo ku aadan kharashyada oo ay heli karaan ka qaybgalayaasha daraasadda.

## Yaa dib-u-eegis ku sameeyay daraasadda?

Cilmi-baaristan ayaa dib-u-eegis ku sameeyay oo ra'yi wanaagsan ka bixiyeen koox madax-bannaan oo dad ah, oo loo yaqaano Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista (REC), si loo ilaaliyo badbaadada, xaquuqaha, badqabka, iyo sharafta ilmahaaga. Guddiga Anshaxa gabi ahaanba wuu ka madax banaan yahay kooxda daraasadda. NHS trust ee degaankaaga ayaa oggolaatay in daraasadda lagu qabto isbitaalkaaga.

## Maxaa dhacaya haddii aan su'aalo, walaacyo ama cabasho ka qabo daraasadda?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ka qaybqaadashadaada ama ka qaybqaadashada ilmahaaga ee daraasaddan ama aad qabto walaac ku saabsan habka loo fuliyay, waa inaad la xiriirtaa Cilmi-Baaraha degaankaaga ama xubin ka mid ah kooxda cilmi-baarista ee isbitaalkaaga (fafaahinta lagala xiriiro waxay ku qoran tahay halkan hoose).

## Intee in le'eg ayaan ka fikiri karaa in ilmahayga uu ku biiro daraasadda?

Marka ilmahaaga la xaqiijiyo inuu u qalmo ka qaybqaadashada daraasadda waxaad heli doontaa qiyaastii
1 saac oo aad ku gaarto go'aankaaga.

**Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad gelisay akhrinta**

### Faahfaahinta Xiriirka

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan daraasadda waxaad la xiriiri kartaa kooxda cilmi-baarista adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee hoose:

**Cilmi-baaraha Ugu Wayn:** *Update with local details*

Magaca: «name»
Cinwaanka: «address»
Taleefanka: «telephone»

**Cabashooyinka/tabashooyinka:** *Update with details for local complaints department and/or Patient Advice and Liaison Service.*

Magaca: «name»
Cinwaanka: «address»
Taleefanka: «telephone»

**Madaxa Cilmi-baarista:**

Magaca: Dr Tom Waterfield
Cinwaanka: «address»
Iimayl: «email»

**FROG Trial Co-ordinating Centre (Xarunta Isku dubaridka Tijaabada FROG):**

Cinwaanka: «address»

Taleefanka: «telephone»

Iimayl: «email

## Bayaanka Hufnaanta

Queen's University Belfast ayaa ah kafaala-qaadaha daraasaddan. Kafaala-qaadaha daraasadda waa ururka mas'uulka ka ah inuu xaqiijiyo in daraasadda loo sameeyay si heer sare ah si loo ilaaliyo xuquuqda iyo badbaadada bukaanka, iyo tayada xogta cilmi-baarista.

**Sideen u isticmaali doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan?**

Waxaan u baahan doonaa inaan macluumaadkaaga ku isticmaalno mashruucan cilmi-baarista. Macluumaadkan waxaa ku jiri doona magacaaga/faahfaahinta lagaala soo xiriiri karo. Dadku waxay macluumaadkan u isticmaali doonaan si ay cilmi-baarista u sameeyaan ama u hubiyaan diiwaannadaada si ay u xaqiijiyaan in cilmi-baarista si sax ah loo sameeyay. Dadka aan u baahnayn inay ogaadaan qofka aad tahay ma awoodi doonaan inay arkaan magacaaga ama macluumaadkaaga xiriirka. Xogtaadu waxay yeelan doontaa lambar koodh ah. Waxaan dhammaan macluumaadka adiga kugu saabsan u ilaalin doonaa si ammaan ah oo badbaado leh. Marka aan dhammeyno daraasadda, waxaan hayn doonaa qaar ka mid ah xogta si aan u hubinno natiijooyinka. Waxaan warbixinadeena u qori doonaa qaab aysan qofna ku ogaan karin inaad daraasadda ka qaybqaadatay.

Waa maxay kala doorashadaada ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?

- Waad joojin kartaa ka qaybqaadashada daraasadda wakhti kasta, adoon bixin wax sabab ah, laakiin waxaanu hayn doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan hore u uruurinay.
- Waxaan u baahanahay inaan u maareyno diiwaanadaada siyaabo gaar ah si cilmi-baaristu u noqoto mid la isku halayn karo. Tani waxay ka dhigan tahay inaanan awoodi doonin inaan kuu oggolaano inaad aragto ama aad wax ka bedesho xogta aan kaa hayno adiga.

Halkeed ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?
Waxaad wax badan oo ku saabsan sida aan u isticmaalno macluumaadkaaga ka heli kartaa [@]: https://www.hra.nhs.uk/planning-and-improving-research/policies-standards-legislation/data-protection-and-information-governance/gdpr-guidance/templates/template-wording-for-generic-information-document/

Xagga [@]:
https://www.qub.ac.uk/privacynotice/Research/ListofResearchPrivacyNotices/PrivacyNoticeforResearchParticipants.html

- adigoo weydiinaya mid ka mid ah kooxda cilmi-baarista
- adigoo iimayl u diraya kooxda daraasadda FROG: FROG@nictu.hscni.net